Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad
Documentiga Kulankii 18aad **Taariikhda: 29/04/2014**

Kalfadhga 4aad
Kulankiisii 18aad
Saacada la furay: 11:10 am
Saacada la xiray: 3:13 pm
Guntanka: 158 xildhibaan

Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Qeybinta Talo soo jeedinta xeer Hoosaadka**
4. **Sii wadida Su'aal wadareedkii wasiirka arrimaha Gudaha iyo Federaalka.**
5. **Qado iyo Salaada Duhur**
6. **Sii wadida Su'aal wadareedkii Wasiirka Amniga Qaranka**
7. **Ka doodida Warbixinta Guddiga Gaadiidka Dekadaha iyo wadooyinka** ee **la xiriirta (Heshiiskii Shirkada Favori)**

Shir-Guddoonka: Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Baarlamanka

Mudane Jeylaani Nuur iikar

Waxaa shirka furey Guddoomiye ku xigeenka 1-aad Golaha Shacabka Mudane Jeylani Nuur Iikar, waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uu Akhriyey Xildhibaan: Sheekh Shaacir, Guddoomiyaha waxa uu xidhibaanada uu weydistey in ay Ansixiyan Ajendaha weyna Ansixiyeen.

Xildhibaan:Cabdi Xaashi C/laahi Point of order wuxuu soo jeediyey,arinta aan ka doodeyno waa xasaasiyad inta aan su'aasha la weydiin wasiirka waxa-an ka dooneynaa in uu noo soo gudbiyo liiska gobolada iyo degmooyinka qo-raalkooda sida ay u kala magacaaban yihiin in aan ogaano.

Intaa ka dib **Guddoomiyaha** ayaa ku soo dhaweeyey Wasiirka Arimaha Gudaha

Xildhibaan Maxamed xasan Aadan wuxuu sheegey,waxaan codsanayaa in la ii ogolaado xaalada ka dhacdey tuulada kabxanley Tr:12/6/2013kii, waxey weeraren tuulada kabxanley,waxaana weerarey maleeshiyo waxey jareen 4000 geed mirood, waxaa tagey Madaxweynaha iyo Rai'sal wasaaraha, waxa kale oo tagey 8xubnood oo isugu jira xildhibaano iyo wasiiro, aniga waan ka mid ahaa iyo wasiirka hada nala jooga, dowlada waxey go'amiyeen in dadkaas la soo qab-qabto,dadkaasi waa la maxkamadeen karaa dowlada waxey amar ku bixisey in qoryaha laga qaado, waxa kale oo ay gubeen 412 motor oo ay ku jiraan 2motor 6bustanle ah, wasiir kasto waa tagaa yaa looga dacwoonayaa dhibka halkaas ka dhacay yaa masu'l ka ah dhibkas oo wax ka qabanaya waxaan heynaa Vidiyow oo leyf ah dadkii halkas deganaa waa la laayey caruuro badan wey dhinteen

Dadkii waa carareen waxey aadeen dhanka gobolka hiiraan, waayo dadkii xagey ku hoydaan ileen guryahoodii waa la gubey, ma dowlada ayaa loo cara-raa mase shabaab ayaa loo cararaa, dadka guryahooda ha lagu soo celiyo.

Xildhibaan Cali Nuur Xuseen wuxuu soo jeediyey,in uu qabo 3su'alod documentiga an gacanta ku haya wuxuu ka hadlaayaa meesha markii la xoreeyo maamulkii loo dhisi lahaa , waxaad noo sheegtaa meesha la xoreyey ma adigaa magacabaya mase madaxda kaa sareysa ayaa magacaabeysa, wax-aad noosheegtey in 90 maalmood uu ku eg yahay maamulka hiiraan oo kaliya noosheeg waqtiga uu bilowdey iyo gorta uu ku egyahay, yaa is kaleh magacabist Degmooyinka Gobolka Banaadir, ma adigaa iska leh mase Guddoomiyaha Gobolka Banaadir.

Xildhibaan Maxamed Xuseen Afaraale wuxuu sheegey,sharciga Baarlaman-ka sameeyey Qod:42-44, waa in ay soo abaabulan odayaashii dhaqanka iyo xildhibaanada u dhashey deegan kas, ayagoo jooga adiga ma magacabi kartid waxaan maqalney in dad la soo ururinayo bishan Tr:3/5/2014, leysugu ken-ayo muqdisho oo gobolada iyo degmoyinka laga keenayo arintas ha la jojiyo Waxaa la sooceliyey raashin dad barakacyaal loo wadey maxaa loo celiyey.

Wasiirka C/laahi Godax Bare waxaan aad ugu faraxsanahey Xildhiban. Maxamed xasan, marka bara kacasi uu dhacayey in uu ahaa wasiiradii ay quseysey ayuu ka mid ahaa 4000geed, meel lagu jarayey wasaaradeyda kama warheyso macquul maaha in hal mar 4000geed la jaro, Documentiga uu gudbiyey waa loo baahan yahay, dayactirka waxaan u raadineynaa, Gobolka Banaadir, ciidamada boliska, wadankeena dhibaato badan ayey soo martey Documentigas wax weyn uu ku fadhiyo majirto, waa macaawino la raadinayo.

Marka maamul la sameynayo waxaan halkan ka cadeynayaa in aan la tasha-neyno xidhibaanada, odayaasha dhaqanka iyo dadka deeganka, waxaa jirta in 3xildhibaan oo u dhashey deeganka ay wada yi maadaan hadana ay isku mowqif aheyn, wasaarada iyadoo sharciyada waafajineysa saxeysana maga-caabista waxaa dib loogu noqdey sanadkii 1960-63dii, tan raashinka, waxaa leexsadey dad aan ehel aheyn hadana waa laga soo celiyey, waxaa loo qeyb-iyey dadka ku nool shabeela hoose, balcad, jowhar, dad barakac ay joogaan Raashin waa yaalaa waana la geynayaa degmada buurhakabo, iyo bardaale.

Xildhibaan Bishaar Ugaas Ibraahim wuxuu soo jeediyey,wasaarada Arima-ha gudaha ma diyaarisey Federalisam? Raashinka dadka tabaaleysan loogu tala galey meelo latagi karo ayaa jira maxaa loo geyn waayey? Sida bay, bakol, buur-hakabo, marka waaga baryo xaalada gobolada iyo degmooyinka ay ku sugan yihiin ma ka war heysaan.

Xildhibaan Cabdi Xaashi C/laahi,wuxuu sheegey, su'asheyda waa dadkii gobolada iyo degmooyinka jogey oo maamulayey wadaniyadooda , damiirkoda waxqabad kooda isku mid maaha ,waxaan rabaa karateeriyado-oda ama wax loogu dhiibey ama wax looga qaadey, hadana la soo dirirey Al-shabab mudo dheerna ay soo shaqeynayen xagey aaden.

Xildhibaan Maxamed Maxamud Guure wuxuu soo jeediyey, marka shabab laga xoreeyey oo kaliya maahan hiiraan wax badan ayaa dhib ka dhacay xildhibaano Barlamanka ku jiri ayaa yiri ma taageersanin ,marka maamul la sameynayo waxa hogaaminaya odayaasha dhaqanka, xildhibanada, dadka degaanka ku dhaqan.

Wasiirka C/laahi Goodax Bare su'aasha cali nuur, 90 maalmod ma Hiiran oo kaliyaa mase meelo kale ayaa jira, waxaan leeyahay waa hiiraan oo kaliya go'aankas waxaa gaarey Golaha Wasiirada, dadka lagu soo ururinaya moqdisho waa guddoomiyayaasha cusub oo la rabo in halkaan lagu taba-baro kuma jiraan kuwii hore anaga ma joojineyno, meel shababka laga xoreeyey yaan loo taba-

barin macquul ma ahan, Golaha waxaan rabaa in aad ogaataan waa masu'liyiin oo xilka la wareegayo, dadka barakacyaasha waa soo noq-deen maleeshiyadkana waa laga qaadey, Federaalisimka siyaasad ayaan ka leenahay waan ognahay balse su'aasha hadey tahay federal waa noocee?

Qaabka loo sameynayo howshas wali ma dhameystirna waxa uu noqonayaa sanadka 2016ka, masu'liyiinta ayay wali ka soo dhamaan, federalka 3 waji ayuu yeelanayaa , gobolada in loo sameeyo golihii deeganka,degmada golaha deeganka, sida ay u sameysan lahaayen maamul goboleed, in uu la xaajoodo, gobol-gobol, degmo-degmo, waxaan iri aan sameyno dhiig joojin, anaga meel aan dhib ka jirin ma geyno, kuwo dhib qaba ayaan u geynaa.

markii Qoryoley la xoreeyey oo dhib ka dhacey, waxaan u dirney (10 baabur) waxan amarney in aan lagu shunbin baqaar oo baa-buurka korkiisa ayaa lagu qeybiyey waxaa inoo soo hartey (hal babur iyo bar) waa la naadiyey guri walbo waa buuxaa, halkii baabuur iyo barka, waxaan ka qeybiney shalanbood, dad kasto oo xil laga qaado meel un buu tagayaa, talada wey wanaag santahay in leys xanto ma fiicna, in la is eedeyo ma fiicna, waxaa inoo yaala hayaan badan oo aan dhibka ugu bixikarno.

Guddoomiyaha Golaha ayaa sheegey, xidhibaano xaq baad u leedihiin in aad wasiir kasto aad su'aalo weydiisaan, waa in degananshaha la ilaaliyaa, xildh-ibaan hadii wasiirka la weydiiyo, A.B.C.D, xaq baad u leedihiin in uu ka jawabo

Xildhibaan Faarax Cawad wuxuu soo jeediyey, waxaa la bixiyey dhul xeebeed oo la siiyey dalal shisheeye oo ka dhistey safaarado,howlgalka labaab ee alshabab maxaa idiin qorsheysan, sanadka 1963 ogosto, maaxaa ku jeclaatey waxaa kaloo ka danbeeyey 4 sharci, Duqa magaalada Guddoomiyaha Gobol-ka Banaadir xaq ma u leeyahay magacaabista, dadka malin walba la leynayo Wasaarada wax tiro koob ma ku sameysey.

Xildhibaan Maxamed Xuseen Nuur Xagafe wuxuu sheegey, sharciga ka soo baxey Baarlamaanka ee MadaxWeynaha uu saxiixey wali ma tijaabisey ma la arkey sharcigaan faai'dadiisa, hadaadan galin sow maahan in aad ku dhaqantid.

Xildhibaan Maxamed C/laahi Nuux wuxuu soo jeediyey,ma in kirsantahay sharcigii dhismaha degmooyinka iyo gobolada, Waxaan kaloo hayaa in aad qaadey talaabo aan waafaqsaneyn sharciga oo ah in aadan la tashan xildhibanada iyo odayaasha, oo aad dhistey maamul, marka su'aal lagu weydiiyo in aad ku

qanciso, waad ogtihiin, waad la socotaan, taas cudurdar ma noqoneyso, waxaa igu maqaala ah in Gola Wasiirada ay 14 kaa amuseen, 8ay haa yiraahdeen.

Wasiirka C/laahi Godax Bare arinta xeebaha wey jirtaa in dhowr safaarado-od laga siiyey dhul waxaana bixisey xukuumada howlahay ka qaban lahaaye-en in aan ku caawino, howlgalka ka socda degmooyinka wax weyn ayaan qiy-aasayaa in aan wax ka badelo, ciidankeena waa joogaan ciidamada daba jooga ee bireyfadka waa in ay yaraadaan, sharcigaan L.19 waa aabihii shuruucda oo dhan loo ansixiyey masu'liyada waxey saarantahay wasiirka, mar hadii aan ku dhaqaney Qod:44, shaciga lama hareer marin, dadka ma magacaabo Duqa magaalad balse anigoo ah Wasiirka Arimaha Gudaha ayaa magacabaya dadka waxaa loo magacaabey in la helo isbadel cusub.

ilaa iyo hada wax mu-jiso ah oo Barlamaanka lala qeybsado majirto, meel shabab laga xoreeyey in lagu dhimanayo wey jirtaa, tan kale tijaabo waa la galiyey sharcigaan Qod:6 F:1,waxa uu leeyahay marka la sameynayo maamul waxaa isu imanayo, odayaasha , xildhibaanada, nabadoonada, dadka deeganka, ayagaa iskood usu magacaabaya dowladana qarashka ayay bixineysaa, hadii hal xildhibaan u dhashey gobolkaas uu yiraahdo ma tageersani meeshaas waxba kama jirto maamul u sameyntaas.

Guddoomiyaha Golaha yaa sheegey in la aadayo salad iyo qado ka dibna leysu soo noqonayo.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka,Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,waxaan halkeedii ka sii wadeynaa doodii shaley inoo harsa-neyd, waxaan u yeerayaa Wasiirka Amniga Qaranka, si su'aal wadareed loo weydiiyo.

Xildhibaan Maxamed sheekh Aadan Hiiraale wuxuu sheegey, gunadii agoonta boliska in laga jaro iyo raashinkii, wasiir meesha lagu siiyey bal sheeg, wadooyinka wixii ka baxaya iyo wixii soo galaayo in la ogaado waa fiicantahay, xamar waxaa la xoreeyey mar hore maxaa dhagxaanta loogu jarey.

Xildhibaan Aamino Cumar Jaamac waxey soo jeedisey, ilaa laba maalmood waxaad ku cel-celineyseen Amni-Amni, dadka waa dhimanayaa alle ka cabsi ha lagu daro qof dhimanayo cidi ma celin karto, is casil waa ceeb.

Xildhibaan:Cusmaan Aadan Dhuubow wuxuu soo jeediyey,waxaad ka mid aheyd wasiiradii hore ee saacid kuna fashilmey in ay xilkooda gudan waayeen,

waxaa la weerarey madaxtooyada waxaad tiraahdeen waan fashili-ney side ku fashiliseen ileen amni daradii ayaa sii kordheysee aawey ciidamada boliska, X.D.S. kuwa nabansugida, waxaa hub lagu kala iibsadaa magaalada dhexdeeda, had iyo jeer ciidamada bireyfad ka ayaa la sheegaa, waxaa nagu maqaalo ah in aad qeyb ka tahey ID, aawey baasaborka la cagtiisa maxaa loogu shubi waayey Bankiga Dhexe, maxaa dahabshiil loogu shubay maxaa sababey in guriga shaqaalaha in lasiiyo magareshinka.

Wasiirka C/kariin Xuseen Guleed Aniga agoonta booliska meel looga goste-y lacagtii iyo raashinka ma ogi hadii ay jirto ay lunsadeen waxaa la keenayaa sharciga hortiisa, magaalada muqdisho 6 wado oo baabuurta ka soo gasho ayaa jirta iyo 54 iskoys, xaalada amni awgeed ayaan dhagxaanta u dhignay oo duruuf ayaa keentey inta xiran, inta karaan keena waan dadaaleynaa waan fureynaa qaarkalana waa sii xirnaanayaan.

weerarkii madaxtooyada markii ay wax ka dheceen, waxaa jira ka hor tag, iyo ka daba tag, goorta iyo saacada lama helin, tan aan iri waa la fashiliyey waa, waxey doonayeen in ay qabsadaan madaxtooyada oo dad badan ay ku laayaan sidii ka dhacdey Westi get eeNairobi, oo ay heysteen malmo badan, anagana 40dqiiqo, wax ka yar ayey ku jireen gabigoodna waan ku ku laayney oo waxba kama fakan.

ciidamada wey ku mahadsanyihiin, dhaliil wey jiraan amaan wey jiraan, ciidamada ka soo gala shabaab waxaan u dirnaa tababar iyo dhaqan celin ma ogalin in uu wax ka noqdo dalka qof shabaab ka soo galey, ku wana waxaan u dirnaa maxkamad, shirkadaha amniga waxaan u marnaa xukuumadihii hore meesha ay ugu tala galeen ayaan raacney anagana, suuqa hubka, waa suuqa madow ee hubka lagu kala iibiyo hada ka hor ayaan mar tegney waxaan ka soo qabaney ilaa 16 qori, waan ku dadaaleynaa, tan ID aniga wax shaqa ah kuma lihi, waakan Taliyaha Gaafow waa ila socdaa waa jogaa.

Taliyaha waaxda socdaalka C/laahi Gaafow Waad salaamantihiin Guddoomiyaha iyo mudanayaasha, dad ajnabi oo guri lasiiyey maahin waxaan ka midnahay dowlada, waxaana dhisey Madaxwenihii hore Maxamed Siyad Bare allah u naxariiste, shaqaalaha ayuu siiyey, anaga waxaan ka midnahay dowlada waana u baahaney Qaranka ayan ugu shaqeynaa, tan IDga.

dowlado badan oo aan xiriir laleenahay xaga baasa-boorka ayaa mar walbo waxey nayiraahdaan maxaa idiin wehliya baasabor-kiina noo soo gudbiya daatada

waxey taalaa soomaaliya dhexdeeda manta ayey ku haboontahay IDga, waayo dalka waa nabad, shirkada waan u sheegney in ay soo rarto warshada, daatada waxba kama bedelin, waxaa nala yiri maxaa federal ugu qori weysey basaborka lama bedelin midabkiisa iyo calaa-madahiisa, lacagta waxaa tiraahdeen maxaa loogu shubey Dahabshiil, aniga kaligey ma saxiixo, waxaa ila saxiixo wasiirka maaliyada ilaa gobol iyo degmo waa la gaarsiiyey baasaborka lacagta waxaa lagu shubaa Bankiga Dhexe.

Xildhibaan Maxamed Cabdi Xayir Maareye wuxuu soo jeediyey,wasiirka jawaabta uu bixinaayo aniga kuma qanacsani inta uu xilka hayey wasiirka waxaa jirey dhacdooyin badan oo culus oo ka mid ah Madaxtooyo, U.N.D.P, Maxkamada, waxa uu yir tiro badan ayaan baajiney, wasiirka waxa uu xilka qabtey waqti wanaagsan oo shabab la eryaayo meelo dheer-dheer ayaa la garsiiyey waqtigas shabab, dowlada saacid waxaa lagu ee deeyey amni daro wasiir diyaar ma u tahay qiyanka in aad gacantaada ku bur-buriso, wasiir inta aan dadka ku eersan maxaa kuu qorsho ah, U.Nka jubuu xirey adinkana jidad-ka kale ayaad xirteen.

Xildhibaan Cusmaan xaaji Cali wuxuu sheegey,wasiir 20-23Apri, waxaa xamar lagu qabtey shir lagu magacaabo Amniga, dadkii usu tagey waxaa laga soo saarey **,** Amnitayo leh,Xoojin wada shaqeyn hey'adaha dalka, markii 20sano ka dib in la qabto shir amni, waxey taas cadey u tahay in Amnigii faraha ka baxey, qodobadii ka soo baxey shirkaas fulinteeda adiga ayaa iskaleh side qodobadaas loogu dhaqi karaa, lacagta ku baxdey intee dhantahey xageese laga heley, tirada shaqaalaha maxaa looga reebey? Daqliga ay qabtaan hey'adahan maxaa loogu shubi waayey Bankiga Dhexe, Tr:7/7/2013 waxey aheyd in la fuliyo lama fulin ee sharciga waad jabisey shuruucda waxey ku dhisan tahay Dastuurka, maalintii lagu magacaabey Barlamaanka ayaa kalsooni ku Siiyey, 20bilood ka badan ayaad heysaa xilka Amnigana waa muhiim nin xantiisa ma mooga maad fududeysid.

Xildhibaan Cali Nuur Xuseen wuxuu soo jeediyey, waxan qabaa su'aal hey'adaha garsoorka waxey xukumaan kiis adinkana fulinteeda ayaad leedi-hiin waxeyna abuureysaa caqabad sided jeceshahay in aad ugu gudubto caqa-badaas.

Xildhibaan Ubax Tahliil waxey sheegtey,laba su'aal ayaan qabaa sanadkii hore amniga, waxaa ka wanaagsan kan hada waad ogtihiin dhacdadii Hotel (shamow), waxaa jirta gabar ardayad ah in la diley dadii diley waa la yaqaan waxaan rabnaa in loo dilo, gabdhaha ku jira ciidanka booliska waa in la kor dhiyaa waayo nabadsugida iyo amniga gabdhahaa ku wanaagsan.

Xildhibaan Maxamed Xasan wuxuu soo jeediyey, kabxanley waxaa ka jira xasuuq ba'n, caruurta shuban ayaa ku dhacay, waxa ka jira jaago, biyo la'aan

Lama gaarsiin wax daawo ah, dowlada iyadaa ka masu'ah wixii halkaas ka dhacay, guryahoodii laguma soo celin ilaa hada wax loo qabtey ma jiraan.

Wsaiika C/kariin Xuseen Guuled waa jibaadka la ii idmadey waxaa ka mid ah in aan dalka wax dhib ah ka dhicin marna mafilaayo in aan hagranaayo shacabka soomaaliyeed, shirka waxa uu ku soo aadey waqti wanaagsan waxa uu ahaa mid munaasab ah oo dalka faa'ido u leh, anaga nalagama maqlin shir amni ayaan qabaneynaa, shirka dhamaan waa laga soo wada qeyb galey wax dhaliil ah majirin marka laga reebo soomaali-land,talooyin wey ka soo baxee-n miisaaniyada wali xiligeeda lama gaarin, aniga ma maamulo lacagta qasna-da waxaa ku shaqaleh wasaarada maaliyada, aniga amni oo kaliya ayaan ku shaqa leeyahay, aniga kalsooni ayaad isiiseen meel leygala laabtey ma aqaanHey'adaha Garsoorka waxa naga dhexeya xurmo, ardayadii la diley qofkii diley Waxaan u gudbiney cadaalada Garsoorka ayagaan jawaab ka sugeynaa, gabd-ha ha ciidanka ah waa kuwa ugu horeya hey'adaha amniga kuwaas ayaan ka dhigeynaa ,waxaa la abaal mariyey 5ruux, 4ayaa gabdho ahaa oo heley abaa-lmarin, arinta kabxanley waan ka xumahay xilna waa iga saaranyahay waa na ka xanuunsanayaa, tan mucaawinada waa run xamar ilaa hiiran iskuma furneyn sahey'da Hiiraan waxaan u marsiiney hada ka hor dhanka bada dhamaan xildhibaanada kuwii icanantey iyo kuwii I amaaney wey mahads-anyihiin.

Shir Guddoonka, Guddoomiye Golaha Baarlamaanka Mudane Maxamed Sheekh Cismaan Jawaari oo shir Guddoominayey kalfadhigii 4aad kulankiisii 18aad, wuxuu sheegey in uu shirka xiran yahay sacad markey aheyd 3:13 pm.